

Sheekadii Xiito-Xiito xanaaqday

Denne fortellingen på somali handler om Mustafe som har reist til bygda i ferien. På bygda finnes ikke tv, Ipad, spill, osv. Men det finnes eldre menn og kvinner som forteller barn fortellinger. Bestemora fortalte Mustafe og barna om Skogens konge.

Sheekadan waxaa ka sheekaynaaya Mustafe Xaaji Cali Geeddi mar uu fasaxiisii ku tagay meel baadiye ah oo ay ayeydii hooyo deggen tahay. Mustafe waxa uu ku bilaabay miyiga ama baadiyaha laguma haysto teefee (TV) iyo waxyaboo kaloo badan oon magaalada ku haysanno, sidaas awgeed waa in la helaa wax fiidkii lagu caaweyo. Aniga ayeyday ayaa intabadan ii sheekayn jirtay. Wuxaan ka sheekaynya sheeko aad u fiican oo ay ayeyday iiga sheekaysay.

Beri baa waxaa jiray shir ay dhammaan habar dugaag iskugu yimaadeen shirkasi waxa lagu qashay dibi aad u shilis (cayilan).

Waxa soo daahay (habsaamay) boqorkii xayawaanka libaax. Wuxa is taagtay oo hadashay Dayo Cali (dawoco) oo tiri:

Wuxaan dhammaan marti sharafta u sheegayaa in uu maqan yahay libaax sidaas awgeedna aan la cuni karin hilibka. Marka wrxaa inala gudboon in aan sugno oo aan iska seexanno inta uu libaaxu imanaayo.

Dacawo habeen badhkii markii la wada gam'ay ayay soo kacday oo waxay cuntay hilibkii markay dhoregtay ayay xaydhii hilibka iyo dhiig ku daadaadisay, afkana u marmarisay xiito-xiito oo aan waxba cunin. Waaberigii ayaa libaax oo shaambinaya yimid.

Dacawo oo xalay cuntay hilibkii ayaa mashxarad ku dhufatay oo tidhi ha la soo tooso boqorkii xayawaankalibaax wuu yimid.

Markii la isku soo ururay oo hareeraha laga soo fadhiistay hilibkii ayaa la arkay in hilibkii wax laga cunay oo aanu dhammadyn. Caro ayay inankii libaax kaga dhegtay oo waxa uu bilaabay reen iyo gurxan. Waa la wada naxay oo dib ayaa la isu wadataagay.

Somali fortelling om en løve. Bestemor forteller Mustafe.

Libaax waxa uu yidhi si dhaqso ah ha loo soo saaro wixii hilibkan cunay. Waa la is wada eegay oo mid kastoo xayawaankii ka mid ahiba waxa uu fiiriyay kii ka soo horjeeday. Intaan cidina jawaabin ayay dacawo soo boodday oo tidhi aniga ayaa xal haya.

Waa la soo wada fririay oo waxaa la yidhi dacawooy bal soo daa xalka aad hayso. Waxay tidhi mid kastoo inaga mid ah afkiisa ha la ursado. Libaax baa yidhi markiiba waa fikrad aad u fiican ee ha la sameeyo. Dacawo ayaa saf ka bilawday oo tidhi aniga ayaa bilaabaya. Markay dhexda mamyo ayay soo gaadhay xiito-xiito.

Way ursatay haddana way ursatay mar labaad waxayna tidhi hilibkii waxaa cuntay xiito-xiito. Libaax baa soo booday oo isna ursaday waxa uu yidhi waa run adiga ayaa ctnay. Libaax amat ayuu bixiyay oo waxa uu yidhi xiito xiito ha la xidho. Miskiintii xiito-xiito way yaabtay oo waxa ay tidhi anigu waxba ma cunin.

Libaax baa dhirbaaxo isla kala jiiday oo dheg iyo dhinac fujiyay. Xiito-xiito waxay kalagtay murti, waxalma tidhi.

Haddaan haadoow ku raaco

Haddaan hiliboow ku cuno

Haddaan hurdooy ku seexdo

Haddaan geedoow ku fuulo

Aabbahay xiidba xaffago iguma dhalin. Sidii bayna weli go'doon u tahay.

Baro ereyadanmicnohooda. B-Dayo dacawo

I- Baadiye miyilidka(magaalo). |}-Saq-dhexe habeenbadh

2- Fiid habeenkiintaaanlaseexan II-Hareeraha dhinacyada

3- Caways soojeed I2-Fiiriyey eegay

4- I (aayeel dadka waaweyn (da'da ah) Xiito-xiito xiidin-xiito

5- Dugaag xayawaanka hilibka cuna

6- Shilis cayilan

7- Dawaco dacawo

Somali fortelling om en løve. Bestemor forteller Mustafe.



Foto: Alexas_Fotos /Pixabay

Layli:1 (oppgaver)

Ka jawaab weydiimahan

- 1- Sheekadan ayaa ardayga uga sheekeeyay?
- 2- Ayaa sheekadan ardaydauga sheekeeyay?
- 3- Sheegboqorkaxayawaanka?
- 4- Shirkii lagu wada ballamay ayaaka soo daahay?
- 5- Dibigii la qashay ayaa saqdii dhexe cunay?
- 6- Shimbirta la khiyaameeyay mageceed?
- 7- Subaxnimadii markii uu boqorkii xayawaanku yimid ayaa isugu yeeray xayawaannadii kale?
- 8- Markuu libaaxii raqdii soo dul joogsaday mrxuu arkay?
- 9- Maxay dawacadii tiri si loo soo saaro xayawaankii hilibka cunay?
- 10- Markii ay dawacadii bilawday in ay ursato ama ay fiiriso afka xayawaannada kale maxay aragtay?

Layli:2

Isla doono ereyada isku micnaha ah adigoo xarriiq adeegsanaya,

Dawaco Habsaamid

Daahid Cayilan

Shilis Dayo

Saqdhexe Shimbir

Haad Fiidsi

Waayeel Shirnbirta ay sheekadu ku socotay.

Caweys Habeen badh

Xiito-xiito Cadho (caro)

Xanaaq Qof wayn